# Qurxinta ilkaha: Xirashada Qalabka Ilkaha Toosiya

# Orthodontics: Wearing Cervical Headgear (Somali)

Qalabka ilkaha toosiya waa waa aalad ilko (qalab) oo loogu talagalay in lagu xiro ilkaha kore iyo daamanka si uu ilkaha u toosiyo. Qalabka ilkaha waxa uu kor u celiyaa ilkaha iyo daamanka waxa uuna isku dhaweeyaa ilkaha hoose.


Qalabka ilkaha waxa uu leeyahay saddex qaybood - **qaybta afka lagu xiro**, **xariga daanka** iyo **suunka qoorta lagu xiro** (Sawirka 1 aad).

**Qaybta afka lagu xiro** waxa ay xarig ku leedahay banaanka iyo gudaha. Xariga banaanka ee qalabka ilkaha waxa uu isku xiraa labada qayb ee ugu danbeeya xariga daanka. Xariga gudaha waxa uu ku xiran yahay gudaha afka cunugaaga. Xariga gudaha waxaa la geliyaa asagoo la marsiinaayo darafyada ama gudaha labada tuubo ee ku dhegan ilkaha cunugaaga.

**Xariga daanka ee qalabka ilkaha** waxaa lagu xiraa jeegada iyo qoorta.

**Suunka qoorta ee qalabka ilkaha** waxa uu xaqiijiyaa in xariga daanka uu debacsan yahay uuna yahay badqab.

Marka aad iska saareyso qalabka ilkaha, saar suunka daanka marka hore adoo ka furaaya xariga qaybta afka.




**Sawirka 1** Qalabka ilkaha waxa uu daanka iyo ilkaha kore u dhaqaajinayaa gadaal.


©1984, Dib loo eegay 2021, Nationwide Children's Hospital
Sii socda…

## La noolaanshaha Qalabka Ilkaha

- Cunugaaga waxa uu dareemi doonaa xoogaa cadaadis ah ama raaxo la'aan dhowrka asbuuc ee kugu horeysa ee loo xiro qalabka ilkaha. Tani waxaa sababayaa maadaama ilkahooda ay dhaqaaqayaan.
- Waa muhiim inuu xirto qalabka ilkaha ugu yaraan 14 saacadood maalintii, ama uu u xirto sida dhaqtarka uu u soojeediyay.
- Cunugaaga xasuusi inuu xirto qalabka ilkaha marka uu joogo guriga oo uu daawanaayo telefeshinka, uu sameynaayo layliga iyo marka uu hurdo.
- Dhig meel ammaan ah qalabka ilkaha cunugaaga, meel aysan gaari karin rabbaayado iyo caruurta.
- Cunugaaga waa inuu ilkaha si fiican u rumaydaa uuna wasakhda ka saaraa. Tani waxay ka caawineysaa ka hortagga xanuunka ilkaha.

## Taxadar

- Si awood leh ha u gelin qalabka ilkaha hana iskudayin inaad wax kabadesho.
- Cunugaaga ha u ogolaan inuu xirto qalabka ilkaha marka uu carruur kale la ciyaaraayo ama xilligi u ciyaarayo.
- Cunugaaga waa inuusan u ogolaan caruurta kale, dadka waawayn, xayawaanada inay taabtaan qalabka ilkaha marka uu xirto.
- Haddii qalabka kujira gudaha afka cunugaaga uu debco ama jabo, cunugaaga waa inuu JOOJIYO xirashada qalabka ilkaha. La xariir dhaqtarka ilkaha ee cunugaaga haddii ay wax jilcaan ama jabaan.
- Haddii qaybta afka ee qalabka ilkaha wax gaaraan, cunugaaga waa inuu JOOJIYO xirashada qalabka ilkaha. La xariir dhaqtarka ilkaha ee cunugaaga.

## Nadiifinta

- Biyo kulul ku dhaq qalabka afka maalin kasta.
- Suunka qoorta ee qalabka ilkaha waxaa lagu dhaqi karaa saabuun fudud. Si fiican ugu dhaq biyo nadiif ah, kadibna qalaji.

## Balamaha dhaqtarka ilkaha

- Soo qaado qalabka ilkaha ee cunugaaga markasta oo aad ballan leedahay.
- Dhaqtarka ilkaha waxa uu isbedel ku sameyn doonaa qalabka ilkaha markasta oo aad timaado.
- La xariir dhaqtarka ilkaha ee cunugaaga haddii qalabkooda jilcaan ama jabaan.
- Ballamaha dhaqtarka ilkaha waxa ay noqon doonaan 4 illaa 12 kii asbuucba mar.
- Waydii dhaqtarka ilkaha su'aalo kasta oo ku saabsan qalabka ilkaha.